Tusmada Isticmaalaha ee Prosper Portland

Waxaa dib loo cusbooneysiiyay: Maarso 2025

# Mawduucyada


**Khulaasada ... 3**

**Caawimaada Turjumaadda Luuqadda ... 3**

**Ciwaannada Loo Adeegsado gelitaanka Adeegyada Adeeg Bixiyaha ... 5**

**Baroowsarada lagu talinaayo ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ... 5**

**Diiwaan gelinta New Vendor (Adeeg Bixiye Cusub) ama Existing Vendor (Adeeg Bixiye horey u Jiray) ... 6**

**Gelitaanka Adeegyada Adeeg Bixiyaha ee Prosper Portland ... 17**

**Soo Gelinta Lifaaqyada iyo Xogta Bangiga Diiwaanka Adeeg Bixiyaha ... 18**

**Cusbooneysii Macluumaadka Xidhiidhka iyo Xogta Bangiga ... 24**

**Bixiyaasha Firfircoon: Akhri oo daabac Dalabaadka Iibka ... 28**

**Bixiyaasha Firfircoon: Arag Marxaladda Lacag Bixinta iyo Xogta Lacag Bixinta ... 30**

**Barta Adeeg bixiyaha (Taageerada Vendor Portal) ... 35**

**Su'aalaha Diiwaan gelinta? ... 35**

## Khulaasada

Waxaad ku bilaabi doontaa hanaanka labada tallaabo ah si aad u furato Bartaada Adeeg bixiyaha (Vendor Portal).Fadlan eeg bogaga xiga ee dukumiintigaan si aad u hesho sharaxaada faahfaahsan adoo adeegsanaaya talaabo kasta oo kamid ah hawsha.

**Tallaabada 1 aad.**Ku biloow in aad isdiiwaan geliso adoo gelinaaya magacaaga koowaad iyo magaca ugu danbeeya, Aqoonsiga Canshuurta Federaalka, iyo ciwaanka iimeylka oo aad gelinayso Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal).Waxaad heli doontaa iimeylka casuumaada si aad u aqbasho abuurista Bartaada Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) oo ay ku jiri doonto koodhka halka mar la isticmaali karo ee 8-da god ah si aad u dhameystirto diiwaan gelintaada. Marka aad ku gasho koodhkaas, waxaad cusbooneysiin doontaa magaca ganacsigaaga iyo xogta xiriirka iyo sidoo kale waxaad soo gelin doontaa foomkaaga W-8 ama W-9 (arag bogaga 1-16).

**Tallaabada 2 aad.**Shaqaalaha Adeeg Bixiyaha ayaa intaas kadib ansixin doona diiwaan gelintaada 2-5 maalmood gudahood. Marka lagu ansixiyo, waxaad awoodi doontaa inaad dib u gasho Bartaada Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) si aad u dhameystirto bogaaga adoo gelinaaya xogta bangiga ee aad lacagaha uga helayso ACH oo soo gelinaaya dukumiintiyadaada diiwaan gelinta ee Magaalada Portland iyo Xoghayaha Gobalka Oregon (eeg bogaga 16-24 aad).

Hambalyo! Waxaad buuxisay diiwaan gelinta Bartaada Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) waxaadna dejinaysaa bogaaga. Iimeylka soo dhawaynta oo ka imaanaaya Adeegyada Bixiyaha ee Prosper Portland ayaa laguu soo diri doonaa muddo yar kadib. Marka shaqadu bilaabato, waxaad geli kartaa Barta si aad u raadiso aadna dib ugu eegto dalabaadka iibsiga iyo mid kasta qaansheegyadaada la xiriira (arag bogaga 26-30 aad).

**Ogoow: Prosper Portland ayaa ka xaqiijin doonta Aqoonsigaaga Canshuurta ee Federaalka Adeegga Canshuuraha Gudaha (Internal Revenue Service, IRS). Haddii Aqoonsigaaga Canshuurta ee Federaalka uusan waafaqsanayn magaca ganacsigaaga hanaankaaga furista bogga adeeg bixiyaha ayaa dib loo dhigi doonaa.**

Waxaad ku heli kartaa Aqoonsigaaga Canshuurta ee Federaalka, oo sidoo kale loo yaqaano Lambarkaaga Aqoonsiga Shaqo Bixiyaha (EIN) dhawr qaab: ka eeg warqadaada xaqiijinta EIN, eeg dukumiintiyada ganacsigaaga (tusaale ahaan, Canshuur celinada, ruqsadaha iyo oggolaanshiyaasha ama dukumiintiga mushaarka sida 1099) ama la xiriir Laynka Canshuurta Ganacsiga iyo Taqasuska ee IRS oo ah 1-800-829-4933.

## Caawimaada Turjumaadda Luuqadda

**Ogoow: Software-ka taageerada turjumaada ayaa la heli karaa laguna saleeyaa dookhaaga luuqadda ayaad awoodi doontaa si loo xaqiijiyo xulashadaada bogaaga hore ee Bartaada Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) iyo gudaha bogaaga Adeegyada Bixiyaha ee Prosper Portland.**

Tallaabada 1-aad. Gal Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland[Prosper Portland Vendor Portal](https://prosperportlandvendorservices.powerappsportals.us/) ama geli ciwaanka soo socda baroowsarkaaga: https://prosperportlandvendorservices.powerappsportals.us/

Tallaabada 2-aad. Guji batoonka sitinka (setting) oo ku qoran calaamada kore ee madoow




Tallaabada 3-aad. Dooro dookhyada Isticmaalaha > Dookhyada




Tallaabada 4 aad. Dooro dookha Luuqadda (Language) oo ku jira qaybta dookhyada Luuqada iyo wadanka/gobalka










## Ciwaannada Loo Adeegsado gelitaanka Adeegyada Adeeg Bixiyaha

Adeegyada Adeeg Bixiyaha ee Prosper Portland ayaa kula talinaaya adeeg bixiyaasha inay isku diiwaan gashaan ciwaanka iimaylkooda ganacsiga/shaqada.

## Baroowsarada lagu talinaayo ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal)

Barta Adeeg Bixiyuhu (Vendor Portal) waxay ku shaqeysaa inta badan baroowsarada waaweyn

**sida Chrome, Edge, iyo Safari.** Kuma talinayno adeegsiga Internet Explorer.

## Diiwaan gelinta New Vendor (Adeeg Bixiye Cusub) ama Existing Vendor (Adeeg Bixiye horey u Jiray)

Adeeg bixiyaasha Prosper Portland ayaa adeeg bixiye cusub ahaan isku diiwaan gelin kara ayagoo raacaaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) Prosper Portland D365. Adeeg bixiyaasha horey u jiray ee Prosper Portland ayaa isku diiwaan gelin kara isticmaale waxayna adeegsan karaan ciwaan adeeg bixiye oo horey u jiray, waxay raaci karaan isla talaabooyinka marka laga reebo meelaha la cayimay.

Diiwaangelinta

Tallaabada 1 aad. Gal [Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal ee Prosper Portland](https://prosperportlandvendorservices.powerappsportals.us/) ama geli ciwaanka soo socda baroowsarkaaga: https://prosperportlandvendorservices.powerappsportals.us/

Tallaabada 2 aad. Guji batoonka Isdiiwaan geli (Register) oo ku qoran calaamada kore ee madoow




Tallaabada 3 aad. Buuxi godadka xogta diiwaan gelinta ee lagaa codsaday ayna ku jiraan ciwaankaaga iimaylka shaqada/ganacsiga iyo Aqoonsiga Canshuurta ee Federaalka (Federal Tax ID), kadibna dooro Isdiiwaan geli (Register). Talaabada 3-aad Adeeg Bixiyaha horey u jiray (Existing Vendor) si loo siiyo tilmaan dheeraad ah:



Fariinta inta shaqada la wado




Fariinta marka la dhameeyo




Ku sii soco talaabada 4 aad.

## Tallaabada 3 aad. Existing Vendors (Adeeg bixiyaasha Horey u Jiray)

Buuxi godadka xogta diiwaan gelinta ee lagaa codsaday marka laga reebo godadka soo socda.

a. Iimeylka Ganacsiga (Adeegso Ciwaanka Iimeylka Shaqada ee Gaarka ah – (tusaale ahaan, person@company.com)
b. Aqoonsiga Canshuurta ee Federaalka (Federal Tax ID)
    a. Adeegso Lambarka Canshuurta ee Federaalka kaas oo la xiriira ganacsigaaga iyo ciwaanka adeeg bixiyaha ee hore

Kadibna guji Isdiiwaan geli (Register).

Haddii Ciwaanka Adeeg bixiyaha la helo, fariin ayaa soo bixi doonta taas oo sheegaysa in Aqoonsiga Canshuurta ee Federaalka (Federal Tax ID) uu horey u jiray. Dooro Kudar (Add) xiriir ahaan.




Ka shaqeysii ciwaankaaga iimeylka rasmiga ah iyo lambarka taleefanka. Dooro Kudar (Add) xiriir ahaan







Ku sii soco Talaabada 4 aad.

Tallaabada 4 aad. Lifaaqa diiwaan gelinta ayaa loo diri doonaa ciwaanka iimaylka ee la gashay intii lagu jiray diiwaan gelinta.

> Ogoow: Fadlan sii ilaa 15 daqiiqo si iimeylku kuu soo gaaro. Xaqiiji in aad eegto Sanduuqa SPAM/Junk ee iimeylka si aad u eegto iimeyl ka yimid invites@microsoft.com. Haddii aadan helin iimeylkaan, joogso oo la xiriir Adeegga Adeeg Bixiyaha ee Prosper Portland oo aad ka helayso VendorServices@ProsperPortland.us si laguu siiyo caawimaad dheeraad ah.

Tallaabada 5 aad. Dooro batoonka/lifaaqa Aqbal Casuumaadda (Accept Invitation) ee ku jira iimeylka diiwaan gelinta




Tallaabada 6 aad. Gal Ciwaankaaga horey u jiray ee Microsoft adoo adeegsanaaya ciwaanka iimeylka la adeegsaday intii lagu jiray diiwaan gelinta ama furo ciwaanka Microsoft ee cusub ee iimeylkaas haddii laguu soo bandhigo.




Ogoow: Haddii iimeylkaaga shaqada/ganacsiga uu ku furan yahay Microsoft, baasaweerka ciwaankaaga ayaa noqon kara baasaweerka iimeylka/shaqada/shabakada ganacsigaaga. Sababo amaan awgood, MA arki karno wax kamid ah baasaweerada. Baasaweerada waxaa keliya og adiga iyo Microsoft iyo/ama ganacsigaaga. Ma awoodno in aan dib u badelno wax kamid ah baasweerada. Haddii aad furato ciwaanka cusub ee Microsoft, xaqiiji in aad lahaato dookhyada soo celinta ciwaanka marka aad isdiiwaan gelinayso si aad baasweerka u badesho marka aad u baahato.

Tallaabada 7 aad. Kadib marka aad geliso baasaweerkaaga horey u jiray ama abuurista baasaweer haddii laguu soo bixiyo, ka shaqeysii ciwaankaaga adoo adeegsanaaya koodhka xaqiijinta ee loo diray ciwaanka iimeylka aad bixisay.







Tallaabada 8 aad. Haddii laguu soo bixiyo, dooro wadanka/gobalka aad ku samayso ganacsigaaga.

Tallaabada 9 aad. Akhri oo aqbal Shuruudo kasta iyo xeerar kasta oo buuxi batoonnada amaanka.

Tallaabada 10 aad. Dooro Aqbal (Accept) si aad ugu xirto Ciwaankaaga Microsoft Adeegyada Adeeg Bixiyaha.



## Diiwaan gelinta Adeeg bixiyaha

Tallaabada 11 aad. Dooro Xiga (Next) si aad u biloowdo ka shaqeysiinta diiwaan gelinta.




<u>Wadanka/gobalka</u>

Tallaabada 12 aad. Dooro wadanka/gobalka quseeya ama geli magaca lasoo gaabiyay godka Kala sooca (Filter).Tusaale ahaan, USA oo aad raacinayso batoonka enter ee kayboorka ayaa ku siinaysa United States.



Xeerarka iyo Shuruudaha isticmaalka

Tallaabada 13 aad. AKhri Xeerarka iyo Shuruudaha isticmaalka. Marka aad ogolaato, guji/u wareeg batoonka ku jira qaybta Aqbal Shuruudaha iyo Xeerarka (Accept Terms and Conditions) si aad u sii wado.




Xogta Shirkadda

Tallaabada 14 aad. Hoosta qaybta Xogta Guud, buuxi godadka soo socda:




a. Nooca ganacsiga
b. Taleefanka
c. Iimeylka (Iimeylka Shirkadda/Ganacsiga) - Iimeylkaan waxaa loo adeegsan doonaa ogeysiisyada ganacsiga wuxuuna ka duwanaan karaa ciwaanka iimaylka ee diiwaan gelinta.

d. Ciwaanka (Dooro “Kudar (Add)” si aad u furato mid cusub)



e. Geli godka “Magaca ama qeexitaanka (Name or description)” (Tusaaleyaasha: Guud, Goobta, Lacag Bixinta, Ganacsiga, Mulkiilaha…)
f. Adeeg bixiyaashu waa inay ku daraan ciwaanka aasaasiga ah ayna gashaan ciwaanka la sheegay ayagoo adeegsanaaya godadka Ujeedada (Purpose) iyo Aasaasiga (Primary).
g. Guji “OK”



Tallaabada 15 aad. Guji batoonka Soo geli foomka W9 (Upload W9 form) si aad u soo geliso foomka W9 ama W8 ee shirkadda.




a. Foomka W9 ayaa la doonayaa kahor inta Dalabka libka aysan bixin Magaalladu ama shaqada uusan qaban adeeg bixiye.







<u>Macluumaadka Xiriirka</u>

Tallaabada 16 aad. Geli godadka xogta xiriirka aasaasiga ah ee ciwaanka adeeg bixiyaha.

a. Magaca Koowaad, Magaca Dhexe (qasab maaha), Magaca ugu danbeeya
b. Taleefanka
c. Ciwaanka (Haddii ciwaanku uu lamid yahay ciwaanka ganacsiga, guji/taabo Ciwaanku waa Isla Kan Ganacsiga (Address same as Business).Haddii kale, dooro Kudar (Add) si



aad ugu darto ciwaan gaar ah qaybta Xiriirka.

## Xogta Ganacsiga

Tallaabada 17 aad. Geli dhammaan xogta qusaysa ee la xiriirta Galka Mulkiyadda, Lambarka Diiwaan Gelinta Magaallada ee qaybta Aqoonsiga Magaallada, Dooro Magaca aad u adeegsanayso 1099 iyo Aqoonsiga Canshuurta ee Gobalka (State tax ID) iyo Gobalka.




## Qaybaha Iibka

Tallaabada 18 aad. Hadda kadib lama adeegsado, waxaad si otomaatig ah ugu gudbaysaa talaabada xigta.

## Foomka Su'aalaha

Tallaabada 19 aad. Akhri xogta iyo lifaaqyada muhiimka ah ee la xiriira Foomka Su'aalaha. Marka aad diyaar tahay, dooro “Buuxi Foomka Su'aalaha (Complete questionnaire)” si aad uga jawaabto su'aalaha.




a. Batoonka "Dhammee (End)" ayaa kasoo muuqan doona su'aasha ugu danbaysa, marka aad dhamayso, guji Dhammee (End) kadibna Marxaladda foomka su'aalaha ayaa noqonaaya "La dhameeyay (Finished)" guji xiga (next) si aad u tagto talaabada ugu danbaysa ee diiwaan gelinta.




Gudbi diiwaan gelinta

Tallaabada 20 aad. Marka aad dhamayso dhammaan xogta diiwaan gelinta,

guji Dhammee (Finish)

a. Waa muhiim in aad dirto diiwaan gelinta asagoo sax ah oo dhamaystiran sida ugu macquulsan




Tallaabada 21 aad. Adeeg bixiyaha la diiwaan gasho ayaa heli doona iimeyl xaqiijinaaya diiwaan gelinta marka Prosper Portland soo afjarto dib u eegista. Tani waxay qaadan kartaa 2 – 5 maalmood oo kuwa shaqada.



## Gelitaanka Adeegyada Adeeg Bixiyaha ee Prosper Portland

Adeeg bixiyaasha Prosper Portland ayaa geli kara Adeegyada Adeeg Bixiyaha ayagoo raacaaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) Prosper Portland D365.

Tallaabada 1 aad. Gal [Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland](https://prospertestvendorportal.powerappsportals.us/) ama geli ciwaanka soo socda baroowsarkaaga: https://prospertestvendorportal.powerappsportals.us/

Tallaabada 2 aad. Guji batoonka Gal (Login)




Tallaabada 3 aad. Geli xogta gelitaanka ee aad adeegsatay intii lagu jiray diiwaan gelinta.




Tallaabada 4 aad. Xaqiiji adiga oo gelinaaya koodhka loo diray iimeylkaaga. Guji batoonka Gal (Sign in).



## Soo Gelinta Lifaaqyada iyo Xogta Bangiga Diiwaanka Adeeg Bixiyaha

Adeeg bixiyaasha Prosper Portland ayaa ku dari kara lifaaqyo Bogooda Adeeg Bixiyaha ayagoo raacaaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) Prosper Portland D365.

Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Homepage) > Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)

Tallaabada 1 aad. Gal Barta Adeegyada Adeeg Bixiyaha ee Prosper Portland (Ka eeg Gelitaanka Adeegyada Adeeg bixiyaha ee Prosper Portland si aad u hesho Caawimaad dheeraad ah.)

Tallaabada 2 aad. Guji ciwaanka "Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)"




Tallaabada 3 aad. Dooro ciwaanka "Soo geli Lifaaqyada (Upload attachments)"




Tallaabada 4 aad. Dooro batoonka "Cusub (New)"




Tallaabada 5 aad. Dooro Dukumiinti (Document)

a. Marka aad doorato Dukumiinti (Document) waxaad soo gelin doontaa dukumiintigaaga bangiga, W-9, diiwaan gelinta Magaalada Portland, iyo diiwaan gelinta Xoghayaha Gobalka Oregon. Ku celi isla hanaanka dukumiintiga kasta oo aad soo gelisay.

Tallaabada 6 aad. Guji batoonka Raadi (Browse)




Tallaabada 7 aad. Dooro dukumiintiga aad

doonayso in aad soo geliso Talaabada 8 aad.

Faahfaahinta dukumiintiga ayaa kasoo

muuqan doonta shaashada



Tallaabada 9 aad. Waxaad arki doontaa lifaaqa oo ku jira shaashada.

Ku celi Talaabada 3 – 9-aad lifaaq kasta oo dheeraad ah oo aad soo gelinayso.

Tallaabada 10 aad. Marka aad dhamayso, dooro batoonka falaarta laabashada si aad u xirto bogga




## Cusbooneysii Galkaaga Adeeg

## Bixiyaha Cusbooneysii Ciwaanka

Adeeg bixiyaasha ayaa cusbooneysiin kara ciwaankooda ayagoo raacaaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ee
Prosper Portland D365.

Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Homepage) > Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)

Tallaabada 1 aad. Dooro ciwaanka xogta Adeeg bixiyaha ee ku qoran bogga koowaad




Tallaabada 2 aad. Ka dooro Faahfaahin dheeraad ah (More Details) > Ciwaanka (Addresses) dookhyada soo baxaaya




Tallaabada 3 aad. Guji sadexda dhibcood ee ku yaala geeska gacanta midig si aad uga doorato kudar (Add) dookhyada soo baxaaya



Tallaabada 4 aad. Dooro Ujeedada ciwaanka.

Tallaabada 5 aad. Geli ciwaanta ganacsigaaga adoo adeegsanaaya godadka Wadanka, Wadada, Koodhka Boostada, Magaallada iyo Gobalka.




Tallaabada 6 aad. Guji batoonka OK

a. Ciwaanka cusub ayaa kasoo muuqan doona qaybta Ciwaannada (Addresses).



Si aad u cusbooneysiiso xogta ciwaanka Lacag Bixinta Adeeg Bixiyaha

(Vendor Remit), raac talaabooyinka hoose: Tallaabada 1 aad. Dooro

Ciwaannada

Tallaabada 2 aad. Guji sadexda dhibcood ee ku yaala geeska gacanta midig si aad uga doorato Wax ka badel (Edit) dookhyada soo baxaaya




Tallaabada 3 aad. Liiska soo baxaaya ee dookhyada Ujeedada (Purpose), ka dooro Lacag dirista (Remit)




a. Cusbooneysii Xogta Xiriirka Shirkadda marka loo baahdo:

a. Wadanka/gobalka
b. Lambarka Boostada (ZIP)/Koodhka Boostada
c. Waddada
d. Magaalada
e. State
f. Godka Degmada Ku Dhaaf




Xaafadda

Faaruq

Tallaabada 4 aad. Guji Okay (OK)

## Cusbooneysii Macluumaadka Xidhiidhka iyo Xogta Bangiga

Adeeg bixiyaasha ayaa cusbooneysiin kara xogta xiriirka ee Barta Adeeg Bixiyaha (Vendor Portal) sida ku qoran qaybta hoose ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland D365.

Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Homepage)

> Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)

Tallaabada 1 aad. Gelitaanka Barta Adeeg

Bixiyaha (Vendor Portal)

Tallaabada 2 aad. Guji ciwaanka Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)




Tallaabada 3 aad. Guji batoonka Isticmaaleyaasha (Users)




Tallaabada 4 aad. Guji lifaaqa khadda buluuga ah si aad u gasho ciwaanka aad rabto




Tallaabada 5 aad. Guji si aad u balaariso qaybta Xogta Xiriirka (Contact information)




Tallaabada 6 aad. Hel godka ku soo jira qaybta aad rabto in aad wax ka badesho kadibna guji godka si aad wax uga badesho xogta godka aad rabto




a. Haddii xiriiro badan la bixiyay, dooro bokiska tigta ee Aasaasiga (Primary) si aad u aragto xiriirka adeeg bixiyaha ee noqon doona xiriirka aasaasiga ah.

Tallaabada 8 aad. Guji batoonka falaarta dib u laabashada si aad u kaydiso xogta aadna u xirto shaashada xogta Adeeg Bixiyaha.




Adeeg bixiyaasha ayaa cusbooneysiin kara xogta bangiga ee Barta Adeeg Bixiyaha (Vendor Portal) sida ku qoran qaybta hoose ee Barta Adeeg Bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland D365.

Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Homepage) > Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)

Tallaabada 1 aad. Gelitaanka Barta Adeeg

Bixiyaha (Vendor Portal)

Tallaabada 2 aad. Guji ciwaanka Xogta Adeeg Bixiyaha (Vendor information)







Tallaabada 1-

aad. Guji dookha soo baxaaya ee “faahfaahinta

dheeraadka ah (More details)” kadibna dooro

“xogta bangiga (Bank information)”

Tallaabada 2 aad. Guji batoonka “Kudar (Add)”

bogga Xogta Shirkadda






Tallaabada 3 aad. Geli xogtaada bangiga si loo

sameeyo ACH

## Bixiyaasha Firfircoon: Akhri oo daabac Dalabaadka Iibka

Adeeg bixiyaasha ayaa eegi kara dalabaadka la xaqiijiyay, lifaaqyada, oo daabacan kara xaqiijinnada PO-yada ayagoo raacaaya tallaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg Bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland D365.

Adeeg bixiyaasha ayaa heli doona ogeysiiska iimeylka marka dalabka iibka la bixiyo. Iimeylkaan ayaa loo diri doonaa ciwaanka iimeylka ee ku xiran ciwaanka adeeg bixiyaha. Arag qaybta Update Cusbooneysii Xogta Xiriirka (Contact Information) si aad u badesho ciwaanka iimaylka ku xiran diiwaankaga adeeg bixiyaha.

Ka gal Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Home page) > Xaqiijinta

Dalabka Iibka (Purchase order confirmation) Talaabadda 1 aad. Guji

ciwaanka xaqiijinta dalabka iibka




Tallaabada 2 aad. Joornaalka Xaqiijinnada Dalabka Iibka ayaa furmaaya. Calaamadi Dalabka Iibka ee aad rabto kadibna dooro Daabac/Dulmar (Print/Preview). Dooro Dulmarka Orjinaalka.




Tallaabada 3 aad. Xaqiijinta PO-ga ayaa lasoo

bandhigi doonaa Talaabada 4 aad. Ka dooro

Degso (Export) liiska dookhyada

Tallaabada 5 aad. Ka dooro nooca faylka dookhyada soo baxaaya si aad u soo degsato xaqiijinta PO-ga. Marka lagu soo dejiyo kumbuyuutarkaaga xaqiijinta PO-ga ayaa la daabacan karaa.

## Bixiyaasha Firfircoon: Arag Marxaladda Lacag Bixinta iyo Xogta Lacag Bixinta

Adeeg bixiyaasha ayaa eegi kara marxallada dhammaan lacagaha ay bixiyeen iyo sidoo kale xogta sida lambarka jeega, risiidka, iyo taariikhda lacag kasta la baxshay iyo faahfaahinta Dalabka Iibka ee lacagta lagu bixiyay adoo raacaaya talaabooyinka hoos ku qoran ee Barta Adeeg bixiyaha (Vendor Portal) ee Prosper Portland D365.

Ka gal Tubta Dookhyada: Bogga Koowaad (Home page) >

Lacagaha Adeeg bixiyaha (Vendor payments) Talaabada 1

aad. Guji ciwaanka Lacagaha Adeeg bixiyaha (Vendor

Payments) ee ku qoran bogga koowaad




Tallaabada 2 aad. Guji ciwaanka La baxshay (Paid)




Tallaabada 3 aad. Bogga Qaansheegyada/Jeegaga (Invoices/Checks) ayaa soo baxaaya. Xogta soo socota ayaa u qornaan doonta adeeg bixiyaha:

a. Akoonka Bangiga
b. Taariikhda
c. Lambarka jeega
d. Heerka
e. Qaataha
f. Nooca lacagta
g. Cadadka




Tallaabada 4 aad. Marka aad gasho liiska, dooro laynka lacag bixinta aad doonayso




Tallaabada 5 aad. Guji Batoonka Guud (General Tab) si aad u eegto faahfaahinta lacag bixinta ee laynka lacag bixinta aad dooratay

a. Akoonka Bangiga
b. Lambarka jeega
c. Nooca lacagta
d. Cadadka
e. Nooca qaataha
f. Qaataha
g. Magaca qaataha
h. Akoonnada Shirkadda
i. Boonada
j. Koodhka sababta
k. Faallada sababta



Tallaabada 6 aad. Guji Batoonka Xawilaada (Remittance)

Tallaabada 7 aad. Arag Goobta Xawilaada Lacag Adeeg Bixiyaha iyo Ciwaanka laynka lacag bixinta ee la doortay




Tallaabada 8 aad. Guji X si aad uga baxdo bogga




Tallaabada 9 aad. Guji ciwaanka La ogolaaday (Approved), aan la bixin (not paid)



Tallaabada 10 aad. Bogga lacagaha La ogolaaday (Approved), aan la bixin (not paid) ayaa soo baxaaya. Xogta soo socota ayaa u qornaan doonta adeeg bixiyaha:

a. Lambarka Qaansheegta
b. Lambarka Dalabka Iibka
c. Taariikhda qaansheegta
d. Taariikhda qaansheegta lagaa Rabo
e. Marxallada qaansheegta (la bixiyay iyo aan la bixin)
f. Lambarka koontada adeeg bixiyaha




Ogoow: Adeeg bixiyaha ayaa akhrin kara faahfaahinta dalabka Iibka asagoo gujinaaya lifaaqa PO ee laynka Lacag bixinta la doortay






## Barta Adeeg bixiyaha (Taageerada Vendor Portal)

### Su'aalaha Diiwaan gelinta?

<u>Adeeg Bixiyaasha Horey u Jiray ee Magaallada</u>

Horey ganacsi ma ula samaysay Prosper Portland adoo adeegsanaaya Barta Adeegyada Adeeg bixiyaha ee hore? Haddii jawaabtu ay haa tahay, waxaan ka codsanaynaa dhammaan adeeg bixiyaasha inay dib isku diiwaan gashaan ayagoo adeegsanaaya ciwaankaaga shaqada ee aasaasiga ah. Hadda kadib qasab kama dhigayno adeegsiga bixiyaha ciwaanka dhinaca labaad sida Google ama Yahoo. Dooro Isdiiwaan Geli (Sign Up) oo ku taala qaybta sare ee bogga si aad u biloowdo.

<u>Ma ku Cusub tahay la Shaqeynta Prosper Portland?</u>

Isdiiwaan gelintu waa mid degdeg ah oo fudud. Waxaan u baahan doonaa ciwaankaaga iimeylka rasmiga ah ee shaqada, Aqoonsiga Canshuurta ee Federaalka (Federal Tax ID)/EIN iyo nuqulka foomkaaga W9. Dooro Isdiiwaan Geli (Sign Up) oo ku taala qaybta sare ee bogga si aad u biloowdo.

Wali ma u baahan tahay caawimaad? Nagala soo xiriir iimeylka ama taleefanka:

**Iimeylka:** VendorServices@prosperportland.us

**Teleefanka:** 503-823-3276